



WARQADA MACLUUMAADKA: Ka ilaalinta Ardayda Takoorka Ku salaysan Isirka La wadaago ama Dabeecadaha Qolada

Xaafiiska Waaxda Waxbarashada ee Xaquuqaha Bulshada (OCR) waxa uu dhaqangalinayaa Title VI ee Xeerka Xaquuqaha Bulshada 1964, kaas oo dhamaan ardayda ka ilaaliya midab takoorka ku salaysan sinjiga, midabka, ama meesha uu asal ahaan ka yimid barnaamij kastaba ama waxqabad kasata oo ay Waaxdu ka hesho taageerada dhaqaale ee Fadaraalka. Warqadaan macluumaadku waxa ay qeexaysaa qaababka ay ilaalintaanu u daboolayso ardayda ah ama loo aqoonsaday in ay yihiin Yuhuud, Kiristaan, Muslim, Sikh, Hindu, Buddhist, ama koox diimeed kale.

Ilaalinta Midab takoorka ee Title VI

1 Ilaalinta midabtakoorka Title IV ee sinjiga, midabka, ama meesha uu asal ahaan ka yimid waxa uu gaarayaa ardayda kuwaasoo la, kulmay midabtakoorka, oo ay ku jirto handadaada, taas oo ku salaysan sifooyinkooda isir raaca ama abtirssima wadaaga ay wadaagaan ee xaqiiqada ku salaysan; ama loo aqoonsaday (i) isir ama dabeecado ay wadaagaan; ama (ii) muwaadin ama degen wadan ay ku badantahay hal diin ama leh aqoonsi diimeed kala duwan. Wixii macluumaad dheeri ah, fadlan eeg OCR's 2017 [ee Ogoow Xaquuqahaaga: Title VI iyo warqada macluumaadka Diinta ee.](#)

2 Title VI waxa uu mamnuucayaa midab takoorka ku salaysan sinjiga, midabka, ama asal ahaan meesha uu ka yimid kaas oo lid ku ah ardayda diin kasta ha haysteene, sida ardayda kasoojeeda Yuhuud, Kiristaan, Muslim, Sikh, Hindu, ama Buddhist, tusaale ahaan, marka uu midab takoorku, iskugu jiro:

- sinjiga, asalka, ama abtirsiime wadaag ama aragtiyaha ku salaysan;
- sida uu ardaygu u egyahay, oo ay ku jirto midabka jirka, aragtida jir ahaaneed, ama sida uu labisto taas oo ka turjumaysa dhaqamada asalka iyo diinta labadaba; iyo
- lahjada shisheeye; magaca shisheeyaha, oo ay kamid yihiin magacyada sida caadiga ah lala xariiriyo in ay wadaagaan abtirsiimo gaar ah ama sifooyinka asal raaca; ama ku hadlaya luuqad shisheeye.

3 Sababtoo ah Title VI kama ilaaliyo ardayda midab takoorka ku salaysan kaliya diinta, sida in la diido codsiga ardayga ee iskuulka si uu fasalka uga baaqdo fasax diimeedka, OCR waxa ay cabashooyinka kusalaysan midab takoorka diinta u gudbisaa [Waaxda Cadaalada ee Maraykanka \(DOJ\)](#), taas oo sharci ahaan awood u leh arintaan.



Tusaalooyinka noocyada dhacdooyinka keenikara walaacyada Title VI, ayadoo oo ay ku xirantahay xaqiiqooyinka iyo xaaladaha waxaa kamid ah:

- Arday Yuhuud ah oo dhigta dugsiga dhexe ayaa macalinka u sheegay in uusan badqab ku dareemayn dugsiga sababtoo ah ardayda fasalkiisa ayaa si joogto ah waxa ay boorsadiisa dhabarka, ugu ridaan qoraalo ay la socoto swastikas, waxa ayna sameeyaan salaantii naasiyiinta sidookale waxa ay ku jeesjeesaan xasuuqii Holocaust. Macalinka waxa uu ardayga u sheegay in uu “iska indho tiro waxaaas” uusana qaadin wax tilaabooyin ah oo u ku gudbinayo handadaadaas.
- Ardaydu waxa ay soo gudbiyaan walaac ku saabsan faalooyinka ay ardayda ay isku fasalka yihiin kabixiyaan marka lagu jiro xiisada taariikhda iyo dhaqanka taas oo la xariirta Sikhism, Islam, iyo caadooyinka kale ee ku baahsan Koofurta Asia. Ardayda muslimiintaa waxaa lagu qeexaa, tusaale ahaan, waxa ay ardayda fasalkoodu u sheegaan “adinka ayaa bilaabay 911” waxaana loogu yeeraa “argagixiso.” Dugsiga waxaa lagu eedeeyey in uusan qaadin tilaabo wax ku ool ah si loo soo gudbiyo warbixinadaas.
- Ardayda Sikh kuwaas oo xirta turban (bahasha madaxa lagu daboosho) waxaa si joogto ah loogu wacaa “turban” iyo magacyo kale marka ay dugsiga joogaan, waxa ayna ardaydu isku dayaan in ay ka qaadan turban uu ardayga Sikh uu xiranyahay. Ardaydu waxa ay soo gudbiyaan in dagmadku aysan talaabo wax ku ool ah aysan ka qaadin si loo qoro loona gudbiyo warbixinadaas.

Muxuu qofku samayn karaa hadii uu ardaygu la kulmo midab takoorka ku salayasan abtirsiimo wadaaga ama sifooyinka asal raaca?

Qofkasta o aaminsan in dugsigu ardayga ku sameeyey midab takoor ku salaysan jinsig, midabka, ama asal ahaan meesha uu asal ahaan ka yimid waxa uu cabasho midab takoor u gudbinkaraa OCR mudo 180 maalmood gudahooda eeda midab takoorka. Si aad u gudbiso cabashada booqo <https://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/complaintintro.html>.

Ilo Dheeraad ah

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga shabakada Midab takoorka Ku salaysan Abtirsiima wadaaga ama Sifooyinka asal Raaca Title VI ee OCR waxaa laga heli karaa www.ed.gov/ocr/sharedancestry.html. Hadii aad qabti wax suaalo ah ama aad jeclaanlahayd cawimaad farsamo fadlan laxariir xaafiiska adeega Gobolka ee OCR ama goobta ay eeda midab takoorku ka dhacayso adiga oo booqanaya <https://ocras.ed.gov/contact-ocr>. Waxa aad sidookale nagala soo xariiri kartaa (800) 421-3481 ama ocr@ed.gov.

Adeegyada helitaanka luuqada bilaashka ah ama ilaha, kuwaas oo ay ku jiraan caawinta farsamada hadalka ama turjumida dukumintiyada qoran ee sida bilaashka ugu diyaarsan OCR, nagala soo xariir 1-800-421-3481 (TDD: 1-800-877-8339) or email us at ocr@ed.gov. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada turjumaada ama fasiraada ee Waaxda fadlan wac 1-800-USA-LEARN (1-800-872-5327) (TTY: 1-800-437-0833) ama iimayl u dir Ed.Language.Assistance@ed.gov. Si aad u codsato dukumiintiyada qaabab kale ah sida Dadka indhaha la ama far waawayn, fadlan Waaxda kala xiriir 202-260-0852 or om_eeos@ed.gov.

Fadlan ogoow in ishaan aysan lahayn saamayn sharci iyo awoodeed toona. Dhaqangelinta Title VI waxa ay ka imaanaysaa Title VI iyo dhaqangelinta sharciyadiisa.